



Ka dib marka naaska lagaa baaro maxaa ku xigaya?

Hambalyo inaad samaysay baaritaan caafimaad oo muhiima!

Sawiradaada waxaa akhriyi doona laba qof oo ah Raajo yaqaano (radiologists). Da'daal kasta ayaa la sameeyey si loo xaqijiyo in natijjooyinkaaga lagu soo diro boostada ama email ahaan laba asbuuc gudahood. Koobi ayaa isagana loo diray dhakhtarkaaga guud oo aad magacawday haddii aadan si kale codsan. Ka raalinoqoshadaada natijjada sawirkaga waxaa la jiri doona diiwaankaaga caafimaadka (My Health Record). Haddii aad wax welwel ah qabto waxaa laga yaabaa inaad booqato websaytka ah www.breastscreen.health.wa.gov.au ama wac (08) 9323 6700 ama kan lacagta jaban oo ah 1800 800 033.

Maxaa dhacaya haddaan u baaha nahay in raajada laygu celiy?

Marmarka qaarkood raajo yaqaano ayaa codsan doona ku celinta X-rayga haddii sawirkla la qaaday aanu waadax ahayn. Haddii kani lagama maarmaan yahay, Waxaad heli doontaa telefoon ama warqad lagaaga codsanayo inaad soo noqoto. Raajadaan lagu celinayo waxaa lagu samayn doonaa rugta caafimaadka ee baarista.

Maxaa dhacaya haddii aan ugu baahnahay raajo kale oo dheeraad ah naaska?

Qiyaas ahaan hal (1) qof oo dumarka (20) labaatankii dumar ahba ayaa la weydiistaa inay soo noqdaan si looga qaado raajo kale oo naaska ah. Raajoooyinkaasi waxay diirada saarayaan meesha loo baahan yahay in loo baaro si faahfaahsan. Haddii taasi laagama maarmaan tahay waxaa kula soo xiriiri doonta BreastScreen WA si ballan laguugu sameeyo.

Dumarka ku nool meelaha magaalada ka baxsan

Meelaha ka baxsan magaala weynta, raajada waxaa qaada BreastScreen Xarumaha Qiimaynta ee WA, oo ku yaalla: Fiona Stanley, Royal Perth and Sir Charles Gairdner Hospitals.

Badanaa raajada dambe waxay muujisaa in aan dhibi jirin. Tira aad u yar oo dumara ayaa u baahan baaritaana intaas ka badan, sida ultrasound ama biopsy. Baaritaanadaas waxaa la sameeyaa isla maalinta raajada.

Dumarka ku nool baadiyaha WA

Dumarka baadiyaha degan raajo siyaada ah ayaa waxaa u sameeya adeega guurguura. BreastScreen WA ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuugu sheegaan haddii baaritaana siyaada ah loo baahan yahay.

Waxaa jira baaris qaybeed oo joogta ah iyo qiimaynta adeega ku taalla Kambaska Caafimaadka Bunbury South West Health Campus.

Waa muhiim in la xasuusto in dumarka badankiis sameeyey baaritaana siyaada ah aanay qabin kansar

Dhamaan dumarka u baahan baaritaana siyaada ah waxay leeyihii fursada ah in loo xawilo Xarumaha Qiimaynta Naaska ama inay arkaan dhakhtar guud. Dhamaan natijjooyinka baarista ee xarumaha Qiimaynta Naaska waxaa la hellaa waqtiga ballanta, marka laga saaro natijjada core biopsy-ga kaas oo diyaar ku noqonaya 24 saac gudahood.

Dumarka qaba kansarka, horay u arkida ayaa si weyn u wanaajinaya fursada daaweyn guul leh. Dumarka yar ee kansarka qaba, hore. Kansarada naasaha yaryar badanaa waxaa lagu daweeyaa qaliin aan ballaarayn marka loo fiiriyo wuxuu u baahan yahay kan balaarani.

Raajada naasku ma muujin doontaa dhamaan kansarada naasaha?

Baarista naaska wuxuu ogaan karaa 70-90% kansarada naasaha. Si kasta ha ahaatee, waxaa dhowr qodob oo welwel leh oo ah kansar aan lagu arki karin mammogram. Waxaa dhici karta in sawirkla naaska ama aanu qaban doonin isbedel kansarka naaska (jiritaan la'aan been ah) ama baaritaana intaas ka badan ayaa la samayn doonaa si loo baaro isbedel aanay keenin kansar naaska ah (jiritaan beena).

Haddii aad dareento wax isbedel ah ee naaskaaga sida buruq, wax ibta ka imanaya ama xanuun ibta ah oo joogto ah, fadlan arag dhakhtarkaaga guud, xataa haddii sawirkii naaska ee ugu dambeeeyey aanu muujin wax astaana oo kansarka naaska ah. Isbedel aan dhibi lahayn, sida burooyin, ayaa badanaa lagu arkaa sawirkla naaska laakiin adiga ayaa laguu sheegayaa haddii loo baahan yahay baaritaano kale.

Maxaa dhacaya intaas ka dib?

BreastScreen WA ayaa kuu soo diri doona warqad marka balantaada sawirka naasku noqonayo. Haddii sabab uun aadan helin warqad, fadlan naga soo wac 13 2050* waxaana kuu samaynaynaa ballan. Sawirada naaskaaga laga qaaday ayaa si taxadarayn ayaa loo hayaa si loo dhinac dhigo iskiriinka ee mustaqbilka.

Dumarka jira 75 sano iyo ka weyn ma helaan xasuusiye laakiin waxaa lagu soo dhowaynayaa inay online-ka iska diiwaangeliyaan ama telefoon u diraan

13 20 50* si ay ballan u hellaan.

Haddii aad bedesho cinwaankaaga, fadlan wac 13 20 50* noona sheeg.

Si aad u hesho turjubaan fadlan wac 13 14 50

(*qiimaha meeshaad joogto)

Maxaa kale oo aan sameeyaa?

Dumarka ka weyn 50 sano, waxay leeyihii barnaamijka baarsita naaska oo BILAASH ah labadii sanaba hal mar.

- Haddii joogto laguu baaro kansarka oo naaska waxay u badan tahay yahay mid waqtii hore.
- Keliya inta u dhexaysa 1–5% oo ah dumarka ayaa u baahan kara baarida naaska iyada oo ku xiran muhiimada taariikhda qoyskeeda ee kansarka naaska.
- Haddii uu horay kuugu dhacay kansarka naaska waa muhiim inaad aragto dhakhtarka guud oo aad samayso baarista naaska oo joogto ah.

La soco naaskaaga

- Baro naaskaaga iyo waxa caadiga kuu ah. Muraayada ka eeg naaskaaga dareena naaskaaga hadba mar.
- Arag dhakhtarkaaga guud haddii aad dareento isbedel aan caadi ah oo naaskaaga.
- Weydi Dhakhtarkaaga Guud wixii ku saabsan caafimaadka naaskaaga baritaankaaga soo socda.

Isbedelada ay tahay in aan la dhayalsan waxaa ka mid ah:

1. Buruq, burqo ama adkaan naaska ah ama kilkilada;
2. Isbedelka ibta sida sida isbedel, ibta wax cusubi ka imanayaan, cuncun ama iskiinka nabara leh;
3. Isbedelka maqaarka naaska sida soo ururid, xuubyeelasho ama guduud;
4. agagaaraha naaska oo ka duwan inta kaleeto;
5. xanuunka naaska oo soo noqnoqnaya.

Wax su'aalla ma qabtaa?

La xiriir dhakhtarkaaga ama wac: BreastScreen WA tel: 13 20 50 wixii balama ah ama (08) 9323 6700 wixii macluumaaad ah ama 1800 800 033 wicid lacag jaban oo dumarka

Email: breastscreenwa@health.wa.gov.au

Adeega Gudbinta Qaranka www.relayservice.gov.au

Adeega Afcelinta iyo Tarjumida (TIS) 13 14 50

Macluumaaad intaas ka badan oo afkaaga ah ayaa laga hellaa websaytka BreastScreen WA:

www.breastscreen.health.wa.gov.au/Breast-screening/Multicultural-women



www.breastscreen.health.wa.gov.au